



# HOGOL

**Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGOL Soomaali Maay Newsletter**  
**| Bil'ly - Monthly |**

## Walaa Tirooduung ki jero

- T Afyaal Isaaak Nuur Eething (Isaak Abgaaloo) (1-2)
- Korpus-Corpus (3-4)
- Magmaag (5)
- Dhaghanky (5)
- Ooysy (5)
- Husky 26 June iyo 1 Luliyi 1960kii (6)

**Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad**

### Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaaligy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

**Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Afmaay Development Center (ADC)**

**Email:**

[afmaaydevelopmentcenter@gmail.com](mailto:afmaaydevelopmentcenter@gmail.com)

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

**Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.**



Afyaal Isaaak Nuur Eething oo ki maghy dheerraayi ( Isaak Abgaalow) maay ki dhalathey buuly le erraaw Digidghy oo ku tirsing beledky Bardheery sinidky madii haayy 1943. Barbaarnimaathys maay haayey gaal jer.

Sinidkii 1958 yee gaaly haku tapi, maaynaa kooyeey beledky kismaanny oo haanoo ehelsheey kumid eh deghinaayeeng..

1964tii yee hang wareeghi beledky Hamar. Sinidkii madii haayy 1967 yee may bilaaweey ini usy barbaartoo Abgaal haaty ing raho dheelowky dheel dhaghymeedshoo.

Dadkoo ku kooyeeng Buuly Eelaay oo meelaas dheel ing kooyeeng ya may aragheeny Abwaan Isaaq Nuur oo si feyly dhaghyngkii Abgaalky ing kasaw, madaasaa maay ing biyeeny koonfarty eh “ Isaak Abgaalow”. Dowladii mariithy, Afyaal Isaaq may ku mid haayeey iithyngky qalabky sithy. Madoo af qaad Abowasharow warsathi abwaangky walaa ky qasapi afyaalnimaathy may sheeghay inii ky qasabty, dereeng murug eh oo ku jerii dalky gothob haang; Koofur Orsy.

Afyaal Isaaq Abgaalow maay haayeey Gopoyty; Gopoyshay ingy horeey may ha baheey, sinidkii 1991-tii; geekii arlaathy Dighil ii Mirifly lahaki duuli. Gopyky maghaasheey



maay le eraayey “Murti gopoy ii Moowqif Mujaahid”.

Ilaaheey ing nahariisaa Afyaal Isaak Nuur Eething may haayeey lang eed ing maskang furung oo maskang feyly hattiny maay haayeey lang eed ing jeel hormariyoowky Afky Soomaalighy Maayky; maay kaloo haayeey lang hal-apuur bathang suubiya. Hal apuursheey maaybaa ku mid ahaa ”ISLY GORYNEENG, TOWBY II TANAASULOW, SARKAAL BEEREED, iyoonaay wal usy ing biyi SEDIITHY KAAF BAAS oo soomaalii haaysity ( Kumeel gaar, Kala wareeg ii Kala wareeg ), Aay Deeghoow ii haano kale oo ingty lahangky koopy korny.

Madii lahaku baho fanky, Afyaalky may ku mid haayey dadky naf ii maalby ing huri Dighil ii Mirifly. Iaahey ing nahariisaa Afyaalky may hupung muhiim eh ku haayey ururkii SDM iyoonaay ururky R.R.A usy oo dhib wiing ha mutoosithi waqtyghii R.R.A.

Dhibky usy ha mari maaybaa ku ku huso kornee tusaale haang jeerky madii haayi 10/10/1995 yee habsy konteener eh li gilliyi. Usy oo afar hamiing konteener liki haayii oony liki amaraayy ini usku dhaafo dhiiriyowky iyoonaay guupaapithy usy dhiiriyaayi iithinky R.R.A. Usiiny may eed ingky adkaaysitheey mooqifsheey. Madaas ku reed may ling direey oo liing wareejhiyeey Kaathyshir oo edd ing dhib bathang. Tumung ii li (16) gee ku reed yee usy ii sodong ii lammy (32) qof kale kaathishirky haku fureenoo haku badbaathiyeeng iithingky R.R.A. Ally ing nahariisy Abwaanky may amuuthay 15/5/2016.

### **Gopoykii Aay Deeghoow (Dowloownimaathy/Hukunky):**

*Demeng hore maay ha da'awooteey dogtoo aay Deeghoow la arraaw. Deeghoow maay hang da'wooteey Dighil ii Miriflee hang da'wooti. Aay Deeghoow maay dooshee ku weereey “demeng bathangaa lahai dohowiyeey, demeng bathangna laha I dumaaleey demeng bathangna laha oo dad dhaleey Dighil ii Mirifloow dowky dumaallingaa diyaar ing aha. Deer lamaa derrod ii deer ku mariithiyaa anoo de' yaraa guurby in deerne dowahiis laha ii billaawiyaa dooshee ku weeri. Sithii laha iin dodohowiyaayi lahang dareeri dogii Eething Eddy haayiyaa li dooritheey usuu na-siibkaayno iski darameey iyee dooshee ku weeri. Demeng bathangaa ha oo dad dhaliyaa tarry.*

*Sithii iingku dad dhalaayi hatinny doorishoo dhiitheey Rashiithaa I dumaaleey iyee dooshee ku weeri. Rashiid mi daaynee markiibaa li dileey de'thooleey o dhaleey iyee dooshee ku weeri. Rashiidby hoo li dili hattina Siyaadoow ni daadihi dogii li guraayi iyee si derjhiis eh ii dumaa-liiyaa tarri usughoo maaby iing dowahiine I dafi yaa tarri hooqy dalkibaa haayeey. Anighoo usku dar deyetheey dogii demeng oo dad dhalley dad bathang oo dhali iyee dow horaad dogii lo oo dughutheey duulkoo dughaaq ewa I dafteeng iyee tarri aay deeghoow.*

*Daartii oroosky li iingki diyaariyi haanoo dufung kopo laawu la arraaw qapiil ha dirsithi, derenty duupiyaanoo, digsigy ii daahyaa duduupithaayang, dabky maddi is raho hindhoo damuug-sithaayaang iyee ha I galeengaa tarri aay Deeghoow. Daartiibaa darishathy dabbabad lahaku rithi. Aniiny hortuba dareengsinaayeey reed ha shal dareerniyaa dooshee ku weeri.*

*Damaandy (arjy) bathangaa ha dirsiteey maddii dambe daleelaa has teegdeey Dighil ii Miriflee ha dalbati. Maay tarrey Dighil ii Mirifloow Dogii oo dad dhalaayii wal oo dughutheey dadkii dumaaleey lahaayeengna dalkaa dimbi ku galena daarbaa ing qasane dogiyaa ku dapa seetheeena dooshee ku weeri. Duulkuung dughaaqde eh mis dabi sheenaanoo ising maay dow ii demaamby doob leey ing haataang deebty ing jhiiftaang dow haliingkoona mi dowahiyaasanaa iyee dooshee ku weeri aay Deeghoow. Maay kale ki dartey Dighil ii Mirifloow walaa liski diloo-haayo mi dareemasaana maay dareengkiing maay daari yee ki darti aay Deeghoow.*

**Diyaaring:** Maslah Isaak Boorow (Abyl Kuussoow) ii Abdullahi Sheek Moahmed

## Korpus - Corpus

### May liky jeede Korpus?

Korpus maaybuwaa ururing hapeeysing kinyi saabsing qoraally liingky dang leyi ujeedy gaar eh. Geeky may jeree qoraally eed i badang oo eh hab elektronik leh weydiyow (searching) dhaqsy eh lana isticmaalaaw komputerky. Luqado badang iyee qapaang "Korpus-qarang -National Corpus)" kaas o ku kooping malaayiing eryi eh.

### Korpus may ku koobinyi?

Korpus way ku kooinyaa qoraally waktiyo shal eh, taariik hory ii tu dhow ii meely shal eh ii qoraally rung eh, qoraalo sheeko i qoraally maadooyinky walbarashooda. Luqadda qorong ii tang hathalkiby keydiyo kore Korpus. Korpus maay leyaa qoraally isky dheelitirang si hab samy eh liingki isticmaalo koro.

### Maay luku helee Korpus?

Korpus may luku heleey qoraal meelii lahaku hegedi, qofka qory, meelly la haku daaba'i, goobty i sanadky. Qoraallee may ku koobangyiinaa, war, siyaasy, sheekooying, ii buugaagty dugsiyaa ii internetkiby. May kaloo luku heleey sidy ereydehe eyiing Doo dhis (nahwy) haang sidy qeepoo hadalky (parts of speech), asalky ereydehe, qaabky iniis ged gediyaayaang, qeepoo weerty ama jumlady iyo qaabky toosing ee hingaaddy.

### Erey mey lyky jeede?

Erey maay leyaa ma'ny guud, ma eh erybihing (term), sida dartiyee waajib me eh ing li istimaalo maddii luku doothaaw erey. Lakin wey jirtee in li istimaalo sidy hoos ki qorong:

- Qoraalkasty oo hanaqnaqodow ( Hathal -Token)
- Qoraalky shalduwang ( Typord)
- Erey kasty oo isgedgediyaaw (Lemma)

Tusale haang, wadanky Iswedheng wey qobtee Korps le eraaw [Svenska Korp](#) oo ku koobanng13,260,000,000 (hathal-token)

### Korpusky luqady Af Somaliga Maxaa meeloo luku helo koro maay ku mid ahaa:

- 1) [Somaliska Korp](#)- Iswedheng wey laky helo koree bankiga-luqadda (Spårkbanken), weyna yaalee Jaama'edda Geteborg (Göteborg University) oo ku kooban 18,870,000 (hatha-token)
- 2) [Somali Corpus](#) - Wey kiyaalee Hargeysa weyna leyaa magaa sir ah oo laka galow. Somali Corpus wey ku koobanyaa 3,002,198 (hathal- token)
- 3) [HaBiT Somali Web Corpus](#) (Somali WaC 2016), wey kiyaalee megaaleedy Brno, ee dalky Tjeckien, laakiin wey laku maamulee Eithiopia oo ku koobang 79,741,231(hathal- token)
- 4) Wey kaloo jiree Korpus la hafidy(protected) oo le eraaw [An Crúbadán](#), weya yaalee Saint Louis, USA, oo ku koobang 24,648,653 (hathal- token)

**Maay-Korpus:**

Maybaa so'othaane dathaalo liky suubiyaaw bangi amy ururin Af Soomaaliga Maayky oo yee weddo Harungty Horumariyowky afky Maayky (Af-Maay Development Center) oo kaalathasy Prof. Morgan Nilsson, weyna rajeeyaanee in dathaalathung mira dhala doonaa oo laha saaro doony Maay Korpus hoo Alle erra. May ku edsathaanee qof alla qofkii haayo buug/kutub ki qorong Afky-Maayky inii haniinky diro emailky: [afmaaydevelopmentcenter@gmail.com](mailto:afmaaydevelopmentcenter@gmail.com), (PDF) haang si liinky diinwaangeliyo bangiguung Afky Aayow (af Soomaali Maay Korps).

Illa/source :

[gu.se](http://gu.se) , qoraal usy diyaarisy Prof. Morgan Nilsson, [gu.se](http://gu.se) (Sol.120)

[https://spraakbanken.gu.se/korp/?mode=somali#?lang=en&stats\\_reduce=word&stats\\_reduce\\_insensitive=word&isCaseInsensitive&cqp=%5B%5D](https://spraakbanken.gu.se/korp/?mode=somali#?lang=en&stats_reduce=word&stats_reduce_insensitive=word&isCaseInsensitive&cqp=%5B%5D)

<http://inmyownterms.com/get-to-know-and-use-your-english-corpora-bnc-glowbe-coca-coha-and-more/>

**Diyaaring:** Abdulkadir Abukar Sheikh

## Magmaag:

Apaar bahaase, eepaa reebaase/Apaar bahaasee eepaa dorong

Magmaagddung maay sheeghaasee ing dad meel isli deqeng faylahaang ii humaang, deeqsi ii quthruenimy liki shal oghaathokoro maddii dhib dhiyo gaar ahaang apaar. Madduung maay li fathee ing dhib kastoo bulsho meel deqeng ki dhiyo liingku tabne deeqsinimy, nahariis, iniis turoow, wal iski taroow, wal is siyoow, is kaaalmeeyoow.

Hoo abaarta dhibshee dheeraatho dadky shal bahee, koo maay is arreeyee tiitaaleey ku murug abaartuung sithii naghathaaso may ogha qofna wal ing siithooy. Koonaa maaybaa arreeyee sed Allaa lee kooy sarriigooy dadka wal ing haaysine kaalmeey. Reed dhowaatoo dheeraatoo abaar dhammaathaasee bahaasee doo ii war yee ku dambooyee.

Langkii walaashey usuleei iski reebeey dadby wal ungu siine walki sheekoosisithee waana way eebooyee maaynaa la arreeyee haasid, quthur, nahariis laawuwu, maayna suuroowaase inii bulshitha ku fiirsito reerka dha galsheey dhangka guurky IWM. Saasaa liing ary “apaa bahaasee eebaa dhaafaase”.

**Diyaaring:** Omar Abdulqadir Sheikh  
Abdurahman

**Fasiraad:** Abdullahi Sheikh Mohamed

## Dgaghinky:

Weelky hoos bithy jero emeel geed ku suubsingwu. Kang mithig jeroona emel/gorof oo tolmaanyi eh oo qaby ku suubsingwu. Lammathuba hoolaa ishingkaa (gala ii loothy) yee liki maalee.



**Diyaaring:** Abdullahi Sheek Moahmed

**Ooysy (ta'siyi):** Bahtha Hogol Maayba ooysy tiiraanyi leh in diraayaana ehelkii ii qaraapathii dadkii Galmuthug liki dili. Ilaaheey ing nahariis barbaartii reer koofur galbeed oo si gar darroy eh liki dhamaayi Galmuthug (11/6/2019 afar qof Dhuusmireepaa liki dili 14/06/2019 tumung ii koow qofna galkaayoo liki dili). Qaraapathina Ilaaheey sabar ii iimaang ku siyo. Ing dad muruq maal eh walna ing galabsanne la hasuugho Islaangnimmi me eh, Soomaalinimmy me eh banuu aadminimmy me ah; fal wahashnimmy ewu.



**We demand justice!**



Maaybaa lili yaabinyaa maay reer Koofur Galbeed oo dhulshoo berkooba luku haaysitho oo liki gumeysithoohaayo meel kasty liingki dilee? Jawaabty maaybaa ing negdaa Illiis luku araghi yaa ulliis liki tumee (reer koofur galbeed iyoo ing nekaatheeng). Soomaali maay araasee dhegmy dhegmii koo fujhiaasy. Ilaaheeyna maay arreey “qofkii siingki had guthupo ki had guthupa intii siingki had guthupi ing in dhikinto”. Ing li dul qaathitho oo li saparo faylety. Laaking Saparkaa bathathi sedkaawaa ing baas leyi ama sedkaawaa dhumiyeey. Madduung hooba addaalad li waayo Ilaaheey qisaasaa (aarsishy) binnaayi.



Li ii lapaatungky Juune 1960kii maaybuwaaha maalinkii ingki horreeyi alang Soomaaliyeed dhul Soomaaliyeed luku teegho.



Taasoo astaang ii sumudby ing naghaty matha bannaanithy umuty Soomaaliyeed oo ku hoos bati hukungyii gumeeysighy. 26 Juune Gopollee Waaqoow iyee hurrooweeng Koowty Luul-iona gopollee koofureed reed

#### **Wargiling:**

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmari-yoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, aniiki dir:

**Email.** [afmaaydevelopmentcenter@gmail.com](mailto:afmaaydevelopmentcenter@gmail.com)

#### **Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Developmment Center (ADC)**

**c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet i Sverige**

**Föreningarnas Hus**

**Slottsgatan 13A, 70361**

**Örebro, Sverige**

**Tel. 019-133110**

**E-mail: [sydvast.somaliska@outlook.com](mailto:sydvast.somaliska@outlook.com)**

iski darsmaeeng hal Qarang Soomaaliyeed iyee suubiyeeng.



Goobty Horumariyowky Afky Maayky  
Dooqaadky Af-Maayky



## Hogol



Af-Maay Newsletter

Af-Maay Development Center (ADC)

Email: [afmaaydevelopmentcenter@gmail.com](mailto:afmaaydevelopmentcenter@gmail.com)

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden



Goobty Horumariyowky Afky Maayky  
Dooqaadky Af-Maayky



## Hogol



Af-Maay Newsletter

Af-Maay Development Center (ADC)

Email: [afmaaydevelopmentcenter@gmail.com](mailto:afmaaydevelopmentcenter@gmail.com)

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden